

Light Reading
Maarso/Abril 2020

Fadlan naga caawi faafinta digniinta ka dhanka ah tuugada!

Intii lagu jiray dhawrkii billood ee lasoo dhaafay, City Light waxaa soo gaaray warbixino kala duwan oo ku aadan tuugo isku dayaysa inay dalbadaan xogta dhaqaalaha iyo xogta shaqsigaa ah oo ay la socoto lacag ay dalbanayaan in loogu shubo kaar hor maris ah, ayagoo ugu hanjabaaya macaamiisha inay adeegga ka jarayaan.

Sidaan maaha qaabka aan u samayno ganacsiga.

Waxaan u baahanahay inaan faafino fariintaan! Usheeg saaxiibadaada, qoyskaaga iyo dariskaaga inaan City Light marna soo wacayn ama iimeel usoo dirayn macaamiisheeda ayadoo ka dalbanaysa lacag si ay uga fogaadaan in adeegyada laga jaro. Qof kasta oo ku fashilma inuu dhiibo qarashaadkeena waxa uu helayaa ugu yaraan labo ogaysiis ka hor intaan hawsha adeeg jaristu bilaaban.

Haddii qof soo waco asagoo ka dalbanaaya lacag la xariirta bilka City Light, qofkaas waa tuug. Ku jar taleefanka isla markaba kadibna wac Xarunta Daryeelka Macaamiisha si aad ugsoo wargaliso adoo ka wacaaya (206) 684-3000.

Si aad xog dheeraad ah uga ogaato qaabka aad ku joojin karto tuugada, fadlan booqo seattle.gov/light/EndScams.

Iskudarka Tamarta

Sanadkii 2005, City Light ayaa noqotay shirkada koobaad ee wadanka kutaala oo kuguulaysata qiiqa hawada loosiidaayo oo aan lahayn wax kaarboon ah. Ilaa maanta, inta badan korontada Iftiinka Magaalada waxaa laga dhaliyay xarumaheena nadiifka ah ee korontada biyaha, sida aad ku arki karto ilaheena tamarta ee sanadka 2018 ee hoos kuyaala.

Biogas.....1%
Hydro.....86%
Nuclear*.....5%
Dabaysha.....7%
Aan la qeexin**.....1%
Wadarta guud.....100%

**Shidaalkaan waxa uu matalayaa qeyb ka tirsan quwadda laga soo iibsado Bonneville Power Administration.*

***Shidaalada lagasoo iibsho suuqa jumlooyinka lama qeexo waayo farsamooyinka suuqa tamarta ee hadda jira uma baahna aqoonsi si loo qeexo isha tamarta oo lagu cabiraayo waqti gaar ah.*

Qaado Xujadeena muujinaysa xiliyada daadku dhacaayo

Ha ilaawin inaad isku daydo xujadeena todobaad ee sanadlaha ah ee Seattle City Light si markaas laguugu daro tartan aad ku guulaysan karto mid kamid ah shanteena boorso ee u diyaar garoowga xaalada degdega ah. Wixii la xariira xeerarka iyo u qalmida, booqo energysolutions.seattle.gov/crossword. Tartanku waxa uu dhamaanayaa Maarso 20 keeda, 2020.

Ilaalinta Skagit Tours ayaa Furmayasa Dhawaan

Baro meesha tamartaada aan lahayn kaarboonku ka timaado adoo samaynaaya kormeerada biyo xireenka iyo doonta ee aaga North Cascades! Dhigaalada xagaagan ee Skagit Tours waxay furmayaan Abriil, markaa hore u sii hel tigidyadaada. Wixii warbixin dheeraad ah, booqo SkagitTours.com.

Green Up!

Samee saameyn adigoo wax ku biirinaya mustaqbalka tamarta cagaarka ah oo adkeysii leh, adoo ku biiraya barnaamijka City Light Green Up. Si fudud kukordhi \$3, \$6 ama \$12 biilkaaga bil walba. Wax badan ka baro adigoo booqanaya seattle.gov/light/greenup ama wacaaya (206) 684-3800.

Webseetka Adeegyada Cusub ayaa Dhawaan Soo baxaaya

Waxaan markasta raadinaynaa qaabab aan ku fududayno hawlaha aan u hayno macaamiisheena, waxaana soo wadnaa isbadel wayn oo aan idiin samayn doono. Waxaan bilaabaynaa webseetka adeegyada alaabta cusub.

Marka lagu daro adeegyada oonleenka ee horay u jiray, adeegyada dheeraadka ah waxaa ku jiri doona:

- Inaad si fudud iskaga qorto miisaaniyada biilka
- Helitaanka xogta isticmaalka maalin kasta ee tamarta macaamiisha oo lagu samaynaayo cabirayaal casri ah
- Qalabka adeegyada macaamiisha oo casri ah

Marka uu hawada soo galo webseetkeena cusub ee adeegga korontada, macaamiisha biilalkooda ku dhiibaaya barta oonleenka ah ayagoo adeegsanaaya nidaamkeena hadda jira waxaa laga codsan doonaa inay samaystaan baasweer. Waxaan rajaynayaa in aad ku raaxaysan doonto casriyaynta!

Tallada badbaada ee garoonka

“Go’itaanka korontada ayaa ku bilaaban karta wax laga xumaado laakiin si degdeg ah u noqon kara dhacdo wayn daqiiqado gudahood. Diyaar garoow wanaagsan ayaa qaadanaya waqti dheer si adigga iyo qoyskaagu u heshaan badbaado iyo raaxo.

Si aad macluumaad dheeraad ah uhesho, booqo powerlines.seattle.gov/outage.”

AT Work in Your Neighborhood (Barnaamijka Ka shaqaynta Xafadaada)

Kooxda Seattle City Light waxay joogaan xaafadahaan, ayagoo kashaqaynaaya bixinta adeegyo waxtar leh:

- Arroyo/South Arbor Heights: gelinta fiilooyin dhulka hoostiisa, saqafyada iyo nalalka wadooyinka ee lagu badelaayo kaabayaal aan dhamaaneen;
- Atlantic/Chinatown-International District: Baddelka tiiraarka korontada duugoobay, fiilada korontada iyo qalabka si ay uga caawiso hagaajinta hanaanka koronto ee jira;
- Delridge: baddelka tiiraarka korontada dhamaaday, fiilada korontada iyo qalabka si ay uga caawiso hagaajinta hanaanka koronto ee jira;
- Downtown Seattle: Waxaan rakibaynaa fiilooyinka dhulka hoostiisa mara oo ka samaynayno 4th Avenue si aan u xaqiijino sugnaanshaha korontada;
- Meadowbrook: waxaan badelaynaa fiilooyinka ku meel gaarka ah ee kor mara oo aan u badalayno fiilooyinka dhulka hoos mara oon ka samaynayno 35th Avenue NE;
- South Lake Union: rakibida korontada hoos marka goobta Fairview Avenue North iyo Republican Street.

Kan waa liis aan dhamaystirneen. Haddii aad rabto sharaxaad booqo seattle.gov/light/atwork si aad hesho qariiradeena aadna wax badan uga barato mashaariicda gaarka ah.